

WIDA ACCESS for ELLs 2.0

Waa maxay ACCESS for ELLs 2.0?

ACCESS for ELLs 2.0 waa qiimaynta *xirfadda luqadda Ingiriisiga* oo loogu talagalay fasallada K-12. Imtixaanka waxa la qaadaa sannad walba si looga caawiyo dugsiyada degmooyinku inay la socdaan *horumarka luqadda Ingiriisiga* ee ardayda loo gartay inay yihiin *Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga*.

Waa maxay ujeeddada imtixaankani?

ACCESS for ELLs 2.0 ayaa cabbirta kartida u ardyagu ku fahmayo ee u ku soo saaranayo Ingiriisiga lagu dhex isticmaalo waxbarashada dugsiya dhexdiisa. Afarta qaybood ee imtixaanka ayaa kala ah Dhagaysiga, Akhriska, Hadalka, iyo Qorista.

Waa maxay sababta ay tahay inuu ilmahaaygu qaato imtixaanka?

Ilmahaaga ayaa loo gartay inuu yahay *Barte Luqad Ingiriisi*. Ilmahaaga ayaa qaadan doona imtixaanka sannad kasta ilaa intay dhibcahiisu/dhibcaheedu qancinayaan shuruudaha si lagaga baxayo barnaamijka taageerada luqadda. La xiriir dugsiya ilmahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida ilmahaaga loogu gartay inuu yahay barte luqad Ingiriisi.

Goorma ayuu ilmahaaygu qaadan doonaa imtixaanka?

Gobol kastaa wuxuu u dejiyaa muddo go'an oo ay dugsiyadu ku qaadaan ACCESS for ELLs 2.0. Dugsiyada ayaa jadwalka u geliya markay ardaydu qaadan doonaan afarta qaybood ee imtixaanka, inta lagu jiro muddada go'an ee imtixaan qaadashada. Kala xiriir dugsiya ilmahaaga wixii macluumaad gaar ah oo dheeraad ah ee ku saabsan marka ilmahaaga ballanta loogu qabtay inuu qaato ACCESS for ELLs 2.0.

Sidee loo isticmaalaaa dhibcaha imtixaanka?

Dhibcaha laga helo ACCESS for ELLs 2.0 ayaa loo isticmaali karaa dariiqyo badan. Waalidiinta ayaa u isticmaali kara dhibcaha inay ugu doodaan ilmahooda. Macalimiinta ayaa u isticmaala inay qorsheeyaan waxbaridda iyo qiimaynta. Degmooyinka dugsi ayaa u isticmaala dhibcaha si ay u qiimeeyaan barnaamijyadooda taageerada luqadda, si ay ula socdaan horumarka ardayga koradhsiga Ingiriisiga, iyo si loo ogaado haddii ardayga u qalmo inuu ka baxo barnaamijka taageerada luqadda Ingiriisiga. Dhibcaha ayaa sidoo kale loo isticmaalaa qancinta shuruudaha la xisaabtanka dowladda federaalka iyo ta gobolkaba.

Su'aalaha ah in la Weyddiyo

Waalidiinta ayaa u isticmaali kara su'aalahaan soo socda inay helaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wixii u ilmahoodu kala soo kulmay imtixaanka:

- Sidee ayuu ilmahaaygu u qaadan doonaa imtixaanka?
- Ayaa ka qaadi doona ilmahaayga imtixaanka ACCESS for ELLs 2.0?
- Halkee ayuu ilmahaaygu ku qaadan doonaa imtixaanka?
- Qof ka socda dugsiyada ma u sharraxay imtixaanka inankayga/inantayda?
- Miyay ogyihiin dhammaan macallimiintu inuu isagu/iyadu qaadanayo imtixaanka?
- Haddii u ilmahaaygu leeyahay Barnaamijka Waxbarasho ee Gaarka u ah (IEP), maxaa waafajin ah ee la siin doonaa isaga/iyada muddada uu qaadanayo imtixaanka?
- Goorma iyo sidee ayaa aniga la igula wadaagi doonaa dhibcaha?

La xiriir dugsiya ilmahaaga haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ACCESS for ELLs 2.0.

ACCESS for ELLs ee Dugsi Barbaarinta

Ardayda ku jirta Dugsi Barbaarinta ayaa imtixaanka ku qaadata qaab warqad ah oo kaga qaadda kaarar, buugaag, iyo qaabab imtixaan heerkood fasal ku habboon. Ardayda dhigata heerkood ayaa ka qaadata imtixaanka gooni ahaan qaadaha imtixaanka.

Kelmado Muhiim u ah in La Ogaado

Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga ayaa ah ardayda u qalanta inay dugsiya ka helaan taageero luqadda Ingiriisiga.

Xirfadda luqadda ayaa ah cabbirka heerka u ardaygu ka joogo hab-socodka horumarka luqadda.

Horumarka luqadda ayaa ah hab-socod qaata waqti. Ardayda ayaa uga gudba hab-socodkan heerar kala duwan. Ardayda ayaa uga gudba hab-socodkan heerarka kala duwan.